# Foomka ogolaanshaha

Dukumiintigaan ayaa qeexaaya waxa aad aqbalayso marka aad ogolaanayso inaad ku biirto Daraasada Jiilka. Waa muhiim in aad fahanto sida daraasadu u shaqeyso kahor inta aadan ogolaansho bixin. Waxaad samayn kartaa tan adoo akhrinaaya Xaashida Xogta ka Qaybgalaha (nuqulka 5.0) iyo webseedka daraasada oo ah www.generationstudy.co.uk. Kooxdaada daraasada ayaa kaa caawin doonta sharaxaada iyo ka jawaabidda su'aalo kasta oo aad qabto.

## Fadlan xaqiiji in aad fahmayso xogta soo socota:

### 01 Xogta daraasada

**Daraasadaan waa cilmi baaris.** Qasab maaha wayna ka duwan tahay daryeelka joogtada ah ee ilmahaaga ee NHS. Wali waxaa loo samayn doonaa baaritaanka dhiiga ilmaha dhashay, kaas oo NHS ku talinayso. Si lamid ah cilmi baaris kasta oo caafimaad, waxaa jira faa'iidooyin iyo khasaarooyin ka imaan kara ka qaybgalka.

**Waalidka kale ee ilmahaaga waa in uu ka qaybgalaa go'aankaaga.** Haddii aad waalidka kale la hadasho, waa inaad kala hadashaa arintaan. Waa inuu ku qanacsan yahay in ilmahaaga laga qaybgeliyo daraasada.

### 02 Xanuunada aan baarayno

**Genomics England ayaa baari doonta isbadellada qaar ee hide sidaha ku jira ilmahaaga.** Isbadeladaan ayaa sababi kara 200+ xanuunada hide sidaha ah oo lagu dawayn karo NHS inta ilmuhu wali yar yahay.

### 03 Uruurinta sanbalka

**Dhakhtar ka tirsan NHS ayaa sanbal ka qaadi doonailmahaaga.** Genomics England ayaa u adeegsan doonta sanbalkaan raadinta taxanaha DNA-ga ilmahaaga. Waxaad go'aansan kartaa inaad diido qaadista sanbalka. Tan ayaa ka dhigan in aan ilmahaagu ka qaybgeli doonin daraasada.

### 04 Helitaanka natiijooyinka

**Waa lagula soo xiriiri doonaa si laguugu sheego natiijada baaritaanka.** Ma jiro wakhti loo cayimay arintaan. Haddii aan xanuun looga shakin, waxaa laguugu soo sheegi doonaa iimeylka ama warqad. Haddii xanuun laga shakiyo, khabiirka NHS ayaa kula soo xiriiri doona si laguugu mudeeyo talaabooyinka xiga.

**Natiijadu maaha mid xanuunkii xaqiijinaysa waana in lagu xaqiijiyaa baaritaano dheeraad ah.** Hanaankaan ayaa noqon kara mid hubanti la'aan abuura, sida natiijo aan kala cadeyn ama khaldan. Khabiirka NHS ayaa xogta ku saabsan ilmahaaga dib ugu celin doona Genomics England,si ay uga caawiso fahanka saxnaanta baaritaanka.

### 05 Xogta iyo helitaanka

**Genomics England ayaa meel amaan ah gelin doonta sanballada iyo xogta.** Tan waxaa ku jira sanballada ilmahaaga iyo taxanaha DNA-ga, xogaha ka yimaada diiwaankiisa caafimaadka, iyo xogta ilmahaaga uurka ku jira. Xogta ilmaha uurka ku jira iyo caafimaadka ayaa laga soo qaataa NHS England iyo ururada oo ku qoran barta www.genomicsengland.co.uk/privacy-policy/.

**Xogta iyo sanballada ayaa loo adeegsan doonaa cilmi baaris caafimaad.** Cilmi baareyaal la ogolaaday ayaa geli doona si ay uga shaqeeyaan daawooyin cusub. Waxay ka socon karaa haayadaha khayriga ah, jaamacadaha, iyo shirkadaha daryeelka caafimaadka ee gaarka loo leeyahay, sida shirkadaha daawooyinka.

## 06 Xiriirka joogtada ah

**Genomics England ayaa kula soo xiriiri doonta inta lagu jiro daraasada.** Waxay kula wadaagi doonaan xog waxayna kuu sheegi doonaan fursado dheeraad ah oo aad uga qaybgalayso cilmi baarista.

## 07 Ka bixida daraasada

**Waad joojin kartaa ka qaybgalka daraasadaan marka aad doonto umana baahnid inaad noo sheegto sababta.** Haddii xogta horey loo kaydiyay, ama horey ay qayb uga ahayd cilmi baarista, lama tirtiri karo.

**Daraasada ayaa socon doonta 16 sano.** Marka ilmahaagu jiro ku dhawaad 16, Genomics England ayaa ka codsan doonta haddii uu doonaayo inuu sii wado daraasada si iskiis ah.

Fadlan xaqiiji in aad fahmayso xogta ku qoran Xaashida Xogta ka Qaybgalaha (nuqulka 5.0) iyo bayaannada kore aadna aqbalayso ka qaybgalka adiga iyo ilmahaaga ee daraasada.